ICRC

SOOMAALIYA

# WARSIDAHA CAAFIMAADKA



Guddiga Caalamiga ee Laanqayrta Cas(ICRC) wuxuu taageerayey nidaamka caafimaadka Soomaaliya tan iyo markii ay dhacday dawladdii 1991-dii, taas oo horseeday burburka nidaamka daryeelka caafimaadka iyo kaabayaasha. ICRC oo kaashaneysa Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed ayaa waxay bilaabeen bixinta taageero ayagoo furay rugo caafimaad kana dhigeen xarumo caafimaad iyo isbitaallo oo daryeel u fidiya kuwa ku dhaawacma colaadaha.

ICRC waxay hadda taageereysaa barnaamijka gargaarka degdegga ah, daryeelka caafimaadka asaasiga ah, isbitaallada, hawlaha nafaqada iyo u- kala-gudbinta bukaannada hal heer oo daryeel ah iyo midka xiga iyadoo ku xiran baahidooda (oo loo yaqaan sii wadida daryeelka). Iyadoo la kaashaneysa kooxda gargaarka degdegga ee ICRC, Ururka Bisha Cas wuxuu wadaa barnaamijka gargaarka degdegga ah. Barnaamijku wuxuu dhisaya awoodaha gargaarka degdegga ee mutadawiciinta gargaarka degdegga ee Ururka Bisha Cas iyo bulshada, iyadoo siinaysa xirfadaha lagama maarmaanka u ah ka jawaab-celinta xaaladaha degdegga ah iyo maamulidda daryeelka gargaarka degdegga ah. Sanadkii 2016-kii, saddex kooxood oo gargaarka degdegga ah ayaa laga bilaabay guud ahaan 3 magaalo oo waaweyn kuwaas oo kala ah Muqdisho, Gaalkacyo iyo Laas Caanood si ay wax uga qabtaan xaaladaha degdegga ah, kuwa dhaawaca ahna lagu daweeyo isbitaallada.

Ka sokow barnaamijka gargaarks degdegga ah, ICRC waxay ka taageertaa Ururka Bisha Cas 29 xarumood oo daryeelka caafimaadka asaasiga ah(DCA), (20 xarumo rigli ah iyo 9 rugood ee wareega), dhammaantoodna bixiya adeegyo kala ah daaweyn, ka hortag iyo dhiirigelin. Guud ahaan Koofurta iyo Bartamaha Soomaaliya, sagaal iyo toban oo ka mid ah xarumahaas caafimaad ayaa sidoo kale caruurta da'dooda ka hooseyso shan sano oo qaba Nafaqo Xumo Daran siiyaa adeegyo nafaqo siin ah. Sanadkii 2018-kii, iyadoo ah mashruuc tijaabo oo ka socda labada xarumood ee Daryeelka Caafimaadka Asaasiga ah ayaa ICRC waxay soo bandhigtay adeegyada Gurmadka Degdegga asaasiga ah ee ilmo ka dhalinta iyo ka warqabka hooyada uurka leh iyo daryeelka ilmaha dhowaan dhashay.Intaa waxaa dheer,barnaamijka caafimaadka oo bulshada kaalin firfircoon ku leh oo ka socdo Dalxiiska iyo kormeerka ku saleysan bulshada ee Baydhabo ayaa sidoo kale waxaa la bilaabay masharuucyo tijaabo ah oo ujeeddadoodu ay tahay in barnaamijka Daryeelka Caafimaadka Asaasiga ah lagu xiro bulshada.

Qaliinka ay ICRC u sameyso dadka ku dhaawacma dagaallada iyo daryeelka caafimaadka degdeegga ah oo loo fidiyo dagaalamayaasha iyo kuwa aan dagaalameynin ayaa wuxuu dalka oo dhan ku leeyahay taariikh dheer oo soo jireen ah. Waqtigan xaadirka ah, Koofurta iyo Bartamaha Soomaaliya, ICRC waxay taageertaa afar isbitaal oo qaadi kara 410 sariirood. Isbitaaladu waxay kala yihiin Keysaney (tan iyo 1992-dii), Madiina(2001-dii), Kismaayo(2013-kii) iyo Baydhabo(2014-kii) dhammaantoodna waxay bixiyaan qalliinka loo sameeyo dadka ku dhaawacma dagaallada. Intaa waxaa sii dheer, isbitaallada Baydhabo iyo Kismaayo ayaa sidoo kale waxay daryeel dhanka nafaqada ah siiyaan caruurta bukaan-jiifka ah oo la il daran nafaqo xumo daran oo ay u wehliso dhibaatooyin caafimaad. Sanadkii 2016-kii, ICRC iyo Laanqayrta Cas ee Norway waxay 20 sariirood ugu deeqeen isbitaalka Keysaney si loogu taageero qalliinka isku-furanka. Ururka Bisha Cas wuxuu qabtaa wacyi-gelinta bulshada iyo bukaannada qaba isku-furanka kuwaas oo laga soo diraayo xarumaha Daryeelka Caafimaadka Asaasiga ah loona diraayo isbitaallada.

Taageerada guud ee ay ICRC siiso qaybaha kala duwan ee caafimaadka waa daawooyinka, qalabka, dhisidda kartida, bixinta gunnada shaqaalaha iyo kharashka socodsiinta hawlaha. Iyadoo la adeegsanaayo fikradda ah sii wadida daryeelka, ayaa ICRC iyadoo la kaashaneysa Ururka Bisha Cas, Jimciyad-Qarameedyada la hawlgalaan iyo kooxaha maaraynta isbitaallada ayaa waxay taageertaa isbeddellada barnaamijyada caafimaadka ee Soomaaliya.

# BARNAAMIJYADA CAAFIMAADKA - DARYEELKA CAAFIMAADKA ASAASIGA AH

Daryeelka Caafimaadka Aasaasiga ah (DCA) waa hab bulshada loogu maro caafimaadka iyo bad-qabka oo ku saleysan baahiyaha shakhsiyaadka, qoysaska iyo bulshooyinka.

29-ka xarumood ee Daryeelka Caafimaadka Asaasiga ah oo ku kala yaala Koofurta iyo Bartamaha Soomaaliya ayaa waxaa maamula Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed oo gacan ka helaya ICRC. Xarumuhu waxay daaweyaan caruurta iyo dadka waaweyn oo buka iyo sidoo kale, iyada oo la raacayo jadwalka tallaalka qaranka, xarumuhu waxay bixiyaan adeegyo tallaal oo loogu talagalay caruurta ka yar shan sano iyo haweenka uurka leh. Waxaa kaloo la bixiyaa daryeelka dhalmada ka hor iyo dhalmada ka dib.

Caruurta waxaa laga baaraya nafaqo-darri, waxaana la daaweeyaa kuwa shan sano ka yar oo qaba nafaqo-xumo aad u ba'an. Kuwa ka weyn shan sano ayaa laga daaweeya xanuuno kale maadaama xaaladaha nafaqo-xumada ee da'daas ay tahay naadir. Iyadoo lala kaashanaayo Waaxda Sugnaanta Dhaqaalaha ee ICRC-da, labaatan xarumood oo DCA ah ayaa lagu daaweeya nafaqo-xumada dhexdhexaadka ah ee caruurta ka yar shan sano,haweenka uurka leh iyo kuwa nuujinaya . Sidoo kale, laba ka mid ah xarumaha DCA ah ee(Radaar iyo Dhuusamareeb) ayaa waxay bixiyaan daryeelka degdegga asaasiga ah ee ilmo ka dhalinta iyo ka warqabka hooyada uurka leh iyo daryeelka ilmaha dhowaan dhashay oo 24 saac shaqeeyo, taas oo macnaheedu tahay in daryeel la siiyo hooyooyinka iyo dhallaanka xilliga foosha iyo kadib. Barnaamijkan ayaa bilaabmay bishii Agoosto 2018-kii.

## Nafaqada

Adeegyada nafaqada oo ay bixiyaan xarumaha bukaan- socod- eegtooyinkaUrurka Bisha Cas oo ay kaashanayaan ICRC ayaa waxaa ka mid ah: Barnaamijka Nafaqo-ku daaweynta Bukaan-socodka oo lagu daweyanaayo caruurta nafaqo-xumada daran hayso ee ka yar shan sano; iyo Barnaamijka Bar-tilmaameedka ee Quudinta Dheeriga ah ee caruurta ka yar shan sano iyo haweenka uurka leh, haweenka nuujinaya iyada oo lala kaashanaaya waaxda Sugnaanta Dhaqaalaha.

Waqtigaan xaadirka ah,waxaa jiraa 20 bukaan-socod-eegtooyin oo bixiya adeegyada Nafaqo-ku daaweynta Bukaan-socodka iyo 5 xarumood oo ku kala yaala Baydhabo,Kismaayo iyo Xudur kuwaas oo bixinaya Barnaamijka Bar-tilmaameedka ee Quudinta Dheeriga ah oo qayb ka ah mashruuc tijaabo ah. Ujeeddada mashruuca tijaabada nafaqadu waa hirgelinta barnaamijka Maaraynta isku-dhafan ee Nafaqo-xumada daran kaas oo raacaya tilmaamaha Maaraynta isku-dhafan ee Nafaqo-xumada daran ee Soomaaliya. Wuxuu leeyahay 4 qaybood oo kala ah: ka hortagga nafaqo-xumada oo hoos taga hawlaha wax-qabadka waaxda sugnaanta dhaqaalaha, Quudinta dhallaanka iyo caruurta iyo kulamo barashada nafaqada ah oo loogu talagalay dadka ay dhibaatadu saamaysay, daaweynta nafaqo-xumada dhexdhexaadka ah ee caruurta ka yar shan sano iyo dadka naafada ah, daaweynta nafaqo-xumada daran ee caruurta ka yar shan sano iyo daaweynta dhibaatooyinka caafimaad ee la xiriira nafaq-xumada oo laga bixiyo xarumaha xanaanada degdegga oo ku dhex yaala isbitaalada. Waa muhiim in laga daweeyo caruurta nafaqo-xumada dhexdhexaad ah ay hayso ka hor inta aysan noqon kuwo nafaqo-xumo daran ku dhacda. Caruurta nafaqo darradu hayso waxay helaan nafaqo iyo gargaar caafimaad marka ay xanuunsadaan.

ICRC waxay kaloo taageero siisaa laba xarumood oo xanaanada deg degga ah oo ku kala yaala Baydhabo iyo Kismaayo halkaas oo dhibaatooyinka caafimaadka ee la xiriira nafaqo-xumada daran lagu daaweeyo. Daaweynta ka dib, caruurtu waxaa loo gudbiyaa Barnaamijka Nafaqo-ku daaweynta Bukaan-socodka ilaa looga daweeyo nafaqo-darrada.Marka ilmaha la dhigo Xarunta Xanaanada degdegga iyo caafimaadka

Maryan Maalin waxay eegeysaa kalkaaliyaha caafimaadka oo akhrinaaya Cabbirka Wareegga Gacanta. Cabbirku wuxuu tilmaamaya heerka nafaqo-darrida. Nasiib wanaag, waxay ku jirta cagaarka. Midabka casaanka wuxuu ku yaala dhammadka ugu dambeeya ee shaxda midabka, wuxuuna muujinaaya nafaqo-xumo daran, oo ah xaalad cunuggu u baahan yahay daaweyn naf-badbaadin oo degdeg ah.




©Abdikarim Mohamed/ICRC




Xubin ka tirsan kooxda caafimaadka oo dumar kala hadleysa faa'idada naas-nuujinta, tallaalka,dhaqamada habboon ee fayo-dhowrka iyo nadaafadda. Waxaa dhacay dhaqdhaqaaq kedis ah maadaama dad ka kala yimid tuulooyinka ku hareersan isugu imaadaan mar kasta oo kooxda caafimaadku booqasho ku timaado.

ayaa markaa daryeelaha la siiya cunto. Nafaqo-xumadu waxaa sababi kara cuduro, cunto kugu filan oo aan la cunin iyo arrimo kale.

## Caafimaadka taranka

Guud ahaan koofurta iyo bartamaha Soomaaliya,tiro ku dhow sideetan oo ah Haweenka Shaqaalaha Caafimaadka Bulshada ayaa lagu meeleeyey xarumaha caafimaadka ee Bisha Cas. Haweenka Shaqaalaha Caafimaadka Bulshadu waxay iskaashi la sameeyaan umulisooyinka waxayna siiyaan waxbarashada caafimaadka haweenka iyo u gudbinta haweenka uurka leh xarumaha caafimaadka oo wada adeegyada gurmadka degdegga asaasiga ee ilmo ka dhalinta iyo ka warqabka hooyada uurka leh iyo daryeelka ilmaha dhowaan dhashay, adeegyada daryeelka dhalmada ka hor,daryeelka dhalmada ka dib iyo adeegyada dhalmada la xiriira.Waxay sidoo kale u diraan haweenka qaba isku-furanka xarumha caafimaadka si qiimeyn ugu sameeyaan umulisooyinka. Haweenka ayaa laga daweeya goor hore dhiig yaraanta ama wixii kale oo xaalado ah si loogu diyaariyo u gudbinta isbitaalka Keysaney halkaas oo qalliinka isku-furanka lagu sameeyo.Haweenka Shaqaalaha Caafimaadka Bulshada waxaa loo tababaray barashada caafimaadka,




Koox ka socota waaxda isku-furanka intii lagu guda jiray tababarka lixda toddobaad socday ee qalliinka isku-furanka oo lagu qabtay isbitaalka Hamlin, Itoobiya

wacyi-gelinta isku-furanka iyo aqoonsigiisa, iyo sida calaamadaha halista ah looga eego haweenka muddada uurka ay leeyihiin iyo muddada foosha si goor hore loo gudbiyo loona daaweeyo. Haweenka Shaqaalaha Caafimaadka Bulshada waxaa la siiyey xirmo ay ku jiro wixii ay ku shaqayn lahaayeen si ay ugu caawiso in ay qabtaan howlahooda. Haweenka Shaqaalaha Caafimaadka Bulshadu waxay bixiyaan warbixinno toddobaadle ah oo ku saabsan shaqadooda.

Ururka Bisha Cas wuxuu barnaamijka caafimaadka bulshada ka wadaa xerada barakacayaasha Dalxiiska ee magaalada Kismaayo halkaas oo mutadawiciinta bulshada lagu tababaro kor u qaadida caafimaadka, ogaanshaha kuwa buka oo ku dhex jira bulshada iyo hababka u gudbinta xarumaha caafimaadka rigliga ah iyo kuwa wareega ee Ururka Bisha Cas si loo daaweeyo ama loogu sameeyo gudbin kale. Mutadawiciinta ayaa la siiya agab si ay u fuliyaan hawlahooda. Waxaa sidoo kale looga baahan yahay inay bixiyaan bil kasta xog ku saabsan howlaha la qabtay.




Mutadawiciinta Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed oo gacmahooda ka faraxlanaaya xarunta daaweynta daacuunka. Tiro ka mid ah mutadawiciinta Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed ayaa ku caawinaaya shaqaalaha isbitaalka oo daryeela bukaannada. Kooxaha caafimaadka wareega ee Ururka Bisha Cas ayaa sidoo kale sameynaya booqashooyin guri guri ah oo degmada dhexdeeda ah ayagoo dhiirigelinaya fayo-dhowrka iyo nadaafadda habboon.

# WAREYSI FOOL-KA-FOOL AH OO LALA YEESHAY SEYNAB MACALLIM NUUR, UMULISO/ KALKAALISO CAAFIMAAD

Xirfad ahaan Seynab Macallim waa umuliso/kalaaliso caafimaad. Waxay ka qalin jebisay Jaamacadda SHIFA iyo Jaamacadda SIMAD. Muddo soddon sano ah ayaa Seynab tahay xirfadle dhanka daryeelka caafimaadka asaasiga ah, waxayna waqtiyo kala duwan taageero dhanka farsamada ah siineysay adeegyada Daryeelka Caafimaadka Hooyada iyo Dhallaanka dhowr degmo oo dalka ka mid ah, iyo sidoo kale ka shaqaynta awoodo kala duwan ee gudaha Wasaaradda Caafimaadka iyo dhowr hay'adaha bani'aadamnimada ka shaqeeya ee Soomaaliya. Hadda waxay ka shaqeysaa Ururka Bisha Cas iyada oo ah maareeyaha caafimaadka taranka. Waxaan ka wada hadalnay shaqadeeda.

**S: Waa maxay adeegyada caafimaadka taranka ee laga bixiyo xarumaha caafimaadka ee Bisha Cas?**

**J:**Guud ahaan dalka, Ururka Bisha Cas waa mid ka mid hay'adaha gargaarka bani'aadamnimo ee dalka oo bixiya adeegyada ugu weyn ee caafimaadka taranka.

Ururka Bisha Cas wuxuu maamulaa ku dhowaad 30 rugo caafimaad oo daryeelka caafimaadka asaasiga ah oo dhammaantood adeegyo dhamayestiran oo caafimaadka taranka ah gaarsiya meelaha fog fog iyo meelaha kale oo ay adag tahay in la gaaro ee magaalooyinka iyo miyigaba. Si loo wanaajiyo daryeelka caafimaadka hooyada, dhammaan xarumaha barnaamijkan caafimaadka taranka ayaa sidoo kale lagu daray nafaqada.Hawlaha gaarka ah ee laga sameeyo xarumaha Ururka Bisha Cas waa :

- Xirmooyin dhammeystiran oo adeegyada hooyada badbaadsan ah(Daryeelka dhalmada ka hor/Daryeelka dhalmada ka dib, kala dheereynta ilmaha, daaweynta cudurada galmada lagu kala qaado,meelaha qaarna adeegga gurmadka degdegga iyo gudbinta xaaladaha degdegga ah ee dhalmada
- Bukaannada qaba isku-furanka oo loo diro isbitaalka Keysaney
- Maareynta caafimaadka ee kufsiga



Seynab Nuur oo bukaan wax uga qabaneyso xarunteeda caafimaadka.

**S:Sidee u hubisaan in bulshadu ay la socoto adeegyada caafimaadka taranka ee laga bixiyo xarumaha caafimaadka?**

**J:** Inta badan, xarumaha caafimaadka Ururka Bisha Cas waxay soo jireen muddo dheer waxayna adeegyo lacag la'aan ah siinayeen bulshada, gaaar ahaan meelaha inta badan ku sugan yihiin. Xarun kastana waxay la shaqeysaa dhowr Haweenka Shaqaalaha Caafimaadka Bulshada ah oo si fiican loo ixtiraamo si fiicanna u tababaran. Haweenkan Shaqaalaha Caafimaadka Bulshada ah iyo mutadawiciinta ayaa si joogto ah u booqdaan xarumaha waxayna si xiriir ah u fududeeyaan dhakhtar kale-u-gudbinnada heer bulsho ah iyo isku xirka u dhaxeeya bulshada iyo adeegyada xarunta caafimaadka. Labadan gacmood ayaa ah farsamooyinka Ururka Bisha Cas u adeegsado ilaha faafinta adeegga.

**S: Sidee baad ugu qancin kartaan in haweenka uurka leh ay booqdaan xarunta caafimaadka si ay u helaan daryeelka dhalmada ka hor iyo dhalmada ka dib?**

**J:** Waxaa jira dhowr siyaabood oo umulisooyinkeena ku sugan xarumaha caafimaadka ugu qancin karaan haweenka in ay u xaadiraan daryeelka dhalmada ka hor iyo dhalmada ka dib ee lagula taliyey. Marka hore, umulisooyinkeena ku sugan xarumaha caafimaadka waa kuwo xirfadleyaal ah si fiicanna looga yaqaano degaanka. Aaminadda iyo kalsoonida hooyooyinka uurka leh ay ka qabaan umulisooyinka oo la abuuray sanadihii la soo dhaafay ayaa keentay in ay si joogto ah u tagaan xarumaha caafimaadka dhalmada ka hor iyo dhalmada ka dib si loogu sameeyo baaritaanno. Inta lagu guda jiro booqashooyinka joogtada ah,hooyooyinka uurka leh ayaa waxaa mid walba la siiyaa jadwalka booqashooyinka uurka oo faahfaahsan, kaas oo ku booqanayaan xarunta caafimaadka, foom sheegaya sababta booqasho kasta loogu baahanyahay. Marka labaad, waxaa jira dhiirigeliyeyaal caafimaad oo si wanaagsan u tababaran oo mar walba la hadla bukaannada soo booqda xarumaha kalana taliya hooyooyinka uurka leh dabeecadaha wanaagsan ee caafimaad-raadsashada iyaga oo carabka ku adkeynaya muhiimadda ay leedahay booqashooyinka dhalmada ka hor iyo dhalmada ka dib. Ugu dambeyntiina, waxaa jiraa Haweenka Shaqaalaha Caafimaadka Bulshada kuwaas oo heer bulsho ahaan la shaqeeya umulisooyinkeena,

waxayna si joogto ah u sameeyaan isbitaal-u-gudbinta iyo la socoshada hooyooyinka uurka leh si ay ugu xiraan xarumaha caafimaadka.

**S: Maxay yihiin dhibaatooyinka ugu badan ee dhalmada hooyooyinka lagu arko xarumaha caafimaadka ee kala duwan?**

**J:** Xarumaha caafimmadka ee Ururka Bisha Cas waxay ku yaalaan meelaha ay ka jiraan adeegyo caafimaad oo xaddidan oo aan ka jirin isbitaal-u-gudbinta heerka labaad ah. Dhibaatooyinka dhalmada hooyada ee inta badan lagu arko xarumaha caafimaadku waa:Kalamsiya,foosha oo adkaata, dhiig baxa dhalmada ka dib, dhiig baxa dhalmada ka hor, dhiig yari daran iyo dhibaatooyinka cudurada haweenka.

**S: Sidee u xanaaneysaan haweenka uurka leh ee yimaada xarunta caafimaadka daqiiqadda ugu dambaysa ama marka ay dhibaatooyin caafimaad qabaan?**

**J:** Inta badan xarumaha caafimaadka oo leh adeegyada degdegga asaasiga ah ee ilmo ka dhalinta iyo ka warqabka hooyada uurka leh iyo daryeelka ilmaha dhowaan dhashay oo shaqeeya 24 saac, ayaa had iyo jeer waxaa xarumaha jooga umulisooyin diyaar u ah in ay dejiyaan xaaladda bukaanka waxayna isbitaal ugu gudbiyaan waqtiga ku habboon. Kuwa u baahan maareynta heerka labaad ah waxaan u adeegsanaa isbitaal-u-gudbinta Nidaamka Caadiga ah ee Hawl-galka. Intaas waxaa sii dheer, waxaa jira miisaaniyad loo qorsheeyey bil kasta si loogu caawiyo hooyooyinka u baahan isbitaal-u-gudbinta.

**S: Miyaad faahfaahin ka bixin kartaa wada shaqaynta Haweenka Shaqaalaha Caafimaadka Bulshada? Sidey ku bilaabatay markii hore iyo sideese hadda u shaqaysaa?**

**J:** Wada shaqaynta Haweenka Shaqaalaha Caafimaadka Bulshada waxay bilaabatay markii aan ogaanay baahida loo qabo in la helo xiriir wada shaqayn oo lala yeesho bulshada isla markaana la horumariyo isbitaal-u-gudbinta heerka bulshada ee hadda jira. Si loo hubiyo in aan haysano Haweenka Shaqaalaha Caafimaadka Bulshada oo  isku dheellitiran xoogna leh ayaa waxaan meeleynay saddex Haweenka Shaqaalaha Caafimaadka Bulshada ah oo mid kasta laga soo xulay kooxdooda bulshada/ama xarumaha rigliga ah ee ku yaala tuulada. Laakiin, sababta oo ah tuulooyinka kala duwan oo ay tahay inay booqdaan iyo masaafada ay tahay inay isku maraan tuulo ka tuulo, kooxda caafimaadka wareega ayaa leh 6 Haweenka Shaqaalaha Caafimaadka Bulshada ah. Dhammaan Haweenka Shaqaalaha Caafimaadka Bulshada ayaa lagu tababaray xirmo caafimaad oo dhamaystiran oo loogu talagalay ayaga.  Ilaa iyo hadda, waxaa jiraa xirir dhow oo  wada shaqayn ah  una dhaxeeya Haweenka Shaqaalaha Caafimaadka Bulshada iyo umulsooyinka midba ku sugan tuuladeeda. Dhanka kale, waxaan haynaa qaar ka mid ah aaladaha loo adeegsado gudbinta warbixinta oo aan u soo saarnay Haweenka Shaqaalaha Caafimaadka Bulshada si warbixin toddobaadle ah uga gudbiyaan umulisooyinka. Intaa waxaa dheer, Haweenka Shaqaalaha Caafimaadka Bulshada waxay dhammaan xaaladaha u baahan daryeel caafimaad u gudbiyaan xarumaha waxayna midba tuuladeeda/degaanadeeda ku sameysaa booqashooyinka guryaha. Bil kasta, sarkaalka caafimaadka ee laanta wuxuu isku soo uruuriyaa warbixinada toddobaadlaha ah ee Haweenka Shaqaalaha Caafimaadka Bulshada kana diyaariyo warbixin bille ah. ICRC waxay sidoo kale siisaa Haweenka Shaqaalaha Caafimaadka Bulshada xirmo ku jira qalabka lagu shaqeeyo oo ay adeegsadaan inta lagu guda jiro booqashooyinka guriga.

**S:  Waa maxay gurmadka degdegga asaasiga ah ee ilmo ka dhalinta iyo ka warqabka hooyada uurka leh iyo daryeelka ilmaha dhowaan dhashay iyo halkee laga hirgeliyay Koofurts iyo Bartamaha Soomaaliya?**

**J:** Erey ahaan, gurmadka degdegga asaasiga ah ee ilmo ka dhalinta iyo ka warqabka hooyada uurka leh iyo daryeelka ilmaha dhowaan dhashay waxaa loola jeedaa Asaasaka degdegga asaasiga ah ee ilmo ka dhalinta iyo ka warqabka hooyada uurka leh iyo daryeelka ilmaha dhowaan dhashay. Kani waa barnaamij dhowaan lagu soo daray Qaybta Taranka ee Ururka Bisha Cas sababtuna ay tahay baahida sare ee adeegyadan oo kale. Sanadkii 2018-kii, 5 xarumo caafimaad ayaa loo xushay inay qayb ka noqdaan mashruuca tijaabada laakiin dib u dhac ku yimid dhismaha, kaliya 2 ayaa ilaa hadda si guul leh loo hirgeliyey. Saddexda harsan ayaa hadda ku guda jira habka fulinta .

**S: Waa maxay caqabadaha haysta arrimaha caafimaadka taranka?**

**J:** Mid ka mid ah caqabadaha uu la kulmo arrimaha caafimaadka taranka wuxuu la xiriira xaqiiqda ah in dadku aysan tagin isbitaalka markii la filaayey oo sabab u tahay dhaleeceynta iyo arrimaha kale ee bulshada. Midda ugu xun waa marka haweenka uurka leh ay ku guuldareystaan in ay u xaadiraan booqashooyinka lagula taliyey ee Daryeelka Dhalmada ka hor taas oo xaaladaha qaarkood ay sabab u yihiin caqabado dhaqameed iyo khuraafaadka maxalliga ah ama ayaga oo taga xarunta marxaladda ugu dambeysa ee uurka. Caqabadda kale ee aan la kulanno waa gaaridda.Qaar ka mid ah xarumaha waxay ku yaaliin meelaha durugsan taas oo ka dhigaysa gaaridda  xarunta caafimaadka mid aad u adag,kaabayaasha liita iyo nabadgelyo-darrida ayaa iyagana ah waxyaabaha wax ku biirin kara.

**S: Waa maxay ujeeddooyinka arrimaha caafimaadka taranka?**

**J:** Ujeeddooyinka ayaa ah in la yareeyo heerka dhimashada hooyada iyadoo la siinayo daryeelka ugu fiican ee haweenka uurka leh iyo hooyooyinka nuujinaya ee xarumaha caafimaadka iyo u sameynta isbitaal-u-gudbin ku habboon. Waxaan sidoo kale qorsheyneynaa in aan siino tababaro dheeri ah umulisooyinka Ururka Bisha Cas si aan kor ugu qaadno xirfadahooda si hooyooyinka uurka leh u gaarsiyaan adeegyada dhalmada oo wanaagsan.

# GARGAARKA DEGDEGGA

Barnaamijka gargaarka degdegga ah ayaa waxaa ka jira waddanka oo dhan waxaana looga golleeyahay in kooxo kala duwan iyo bulshooyinka siiyo tababar taageero iyo awood wax qabasho.

Iyada oo ay wehliso Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed, ICRC waxay ka shaqayneysaa sidii xirfado muhiim ah u gaarsiin laheyd bulshooyinka fog oo reer miyiga ah iyo meelaha colaaduhu saameeyeen . Macluumaadka, agabyada loo adeegsado wax-qabadka iyo xirfadaha gargaarka degdegga ah ayaa waxaa la siiya xubnaha bulshada, mutadawiciinta iyo kuwa bixiya wax-qabadyada oo noqday wax-qabadkeena ugu muhiimsan.

Marka laga yimaado shaqada hoose,barnaamjku wuxuu ku fidaya goobo cusub isagoo la shaqaynaya kooxo caafimaad oo kala duwan iyo shakhsiyaadka wadahallada nagala qayb qaata si kor loogu qaado awoodda wax-qabadka degdegga ah ee Muqdisho, horumarinta daryeelka joogtada ah oo u dhaxeeya wax-qabadka koowaad iyo daryeel ka duwan kuwa kale, ka shaqaynta mashaariicda si loo horumariyo sii socoshada Ururka Bisha Cas iyo si dhow ula-shqaynta kooxaha gargaarka degdegga ah ee Ururka Bisha Cas.



Kooxda gargaarka degdegga oo hawl ku dhex jira.

## BARNAAMIJYADA HADDA SOCDA

**Gargaarka degdegga Asaasiga ee Bulshooyinka**
Bulshooyinka u nugul colaadaha, qalalaasaha ama ah kuwa danyarta ah ayaa loo xushta in ay helaan tababarka gargaarka degdegga ah oo ku saabsan sida loola tacaali karo dhaawacyada ay geystaan hubka kala duwan. Tababarada ayaa soconaya 3 maalmood, sida caadiga ahna waxaa ka qayb galaya 25 qof oo ka socda bulshada.

**Gargaarka degdegga Asaasiga ee Mutadawiciinta**
Si loo joogteeyo koox awood leh oo had iyo jeer diyaar u ah in ay ka jawaabaan gargaarka degdegga ayaa laamaha Ururka Bisha Cas waxay si joogto ah ugu tababaraan mutadawiciintooda gargaarka degdegga asaasiga ah. Mutadawiciintan ayaa had iyo jeer u sii gudbaya in ay noqdaan tababareyaal iskood u shaqeysta ama ku biira kooxaha waxqabadka/ka fal-celinta
.

**Tababarka Tababarayaasha**
ICRC waxaa ka go'aan ah inay joogteyso koox tababarayaal ah oo diyaar u ah Ururka Bisha Cas diyaarna u ah inay fududeeyaan tababarada la siiyo bulshada ama tababarada joogtada ah ee mutadawiciinta gargaarka degdegga. Tababarayaasha waxaa la baraa sida loo gudbiyo farriimaha caadiga ah, farsamooyinka la taaban karo, xirfadaha farsamada si kor loogu qaado khibradooda ardeynimo.

**Fallanqaynta Daldaloolada Maaraynta Dhacdada Waxeellada bandan geysata**
Marka loo eego barnaamijyada kale, nidaam cusub ayaa ICRC waxay Muqdisho ka wadaa farsamooyinka fallanqaynta iyo qiimaynta lagu sameeyo kaalin bannaan oo laga arko Dhacdada Khasaaraha Ballaaran ka dhalato. Tani waxay wargelin doontaa oo diradda saari doontaa mustaqbalka daryeelka isbitaalka ka hor iyo sii wadidda waxqabadyada la xiriira daryeelka.

**Taageerada Kooxda Gargaarka degdegga**
Kooxaha gargaarka degdegga ayaa Muqdisho diyaar ku ah 24-ka saac, Laas Caanood, Taleex, Kala baydh, Xuddun, Waqooyiga Gaalkacyo iyo Koofurta Gaalkacyana xilli walba xafiiska kuma sugna laakiin la waco marka dhibaato dhacdo. Kooxahan waxaa maamula kooxaha ay tababartay Ururka Bisha Cas oo ay caawisay ICRC-da.

**Mashaariicda Tijaabada ah**
Guud ahaan Soomaaliya, sanadka 2019-ka mashaariicda tijaabada ah ee hoos ku xusan waxaa bilaabaya Ururka Bisha Cas iyada oo la kaashaneysa ICRC-da.

- Gargaarka degdegga oo ganacsi ah: Iyadoo taageero farsamo ka heleysa ICRC, Ururka Bisha Cas wuxuu qorsheynaya in 4 goobood ka bilaabo Mashruuc Tijaabo ah ee Gargaarka Degdegga oo Ganacsi ah guud ahaan Soomaaliya ee sanadkan 2019-ka. Mashruucan adeegyada tababarka gargaarka degdegga ah oo Ururka Bisha Cas siinaya shirkadaha ayaa u abuuraya suuq uga soo baxo dakhligeeda.
- Qaybaha jawaab-celinta mootada: Sanadka 2019, Muqdisho gudaheeda, ICRC iyada oo ay wehliso Ururka Bisha Cas waxay qorsheyneysaa tijaabo ahaan in ay bilowdo mashruuc Qaybta Jawaab-celinta ee Mootada ah. Ujeeddada laga leeyahayna waa in la kordhiyo awoodda jawaab-celinta iyadoo isla mar ahaantaana la tijaabinaayo waxtarka qaybtan.
- Beacon: Iyada oo lala kaashanaayo Ururka Bisha Cas, ICRC waxay qiimeyneysaa suurtagalnimada bilaabidda mashruuc tijaabo ah si loo wanaajiyo hawlgelinta kooxda gargaarka degdegga.

# WAREYSI FOOL-KA-FOOL AH OO LALA YEESHAY HOGGAAMIYEYAASHA KOOXDA GARGAARKA DEGDEGGA

Cabdullahi Aadan Cabdi, Muxudiin Aadan Mayow, Aadan Cali Aadan iyo Cabdi Samad Xassan Boore, Hoggaamiyeyaasha Kooxda Gargaarka Degdegga ee Muqdisho

Tan iyo markii la bilaabey, Cabdullaahi, Muxidiin, Aadan iyo Cabdi waxay qayb ka yihiin kooxda gargaarka degdegga iyagoo hoggaaminaaya kooxahooda oo dadka dhaawaca ah iyo kuwa buka u fidiya adeegyada gargaarka degdegg ah . Afarta hoggaamiye kooxeed oo fadhigoodu yahay magaalada Muqdisho ayaa nooga warbixinaya waaya-aragnimadooda:

**S: Goormaad ku biirtay kooxda gargaarka degdegga iyo maxaa kugu dhaliyey in aad noqoto kuwa bixiya gargaarka ugu horeeya?**

**J:** Dhammaanteen waxaan ku soo biirnay kooxaha gargaarka degdegga ah tan iyo markii la aasaasey 2016-kii. Dhammaanteen xiiso ayaan u qabnay in aan ka qayb qaadano gargaarka degdegga ah, gaar ahaan ka dib markii aan aragnay kaalinta bannaan ee ka jirtay Muqdisho marka ay timaado adeegyada gargaarka degdegga la gaarsiiyo dadka ku dhaawacmay qaraxyada, dagaallada iyo shilalka kale, iyo heerka ka -falcelinta ee waqtigaas jirtay.

**S: ICRC waxay qabaneysay dhowr sano tababarka Gargaarka Degdegga ah. Faa'ido intee le'eg kuu lahaa tababarku marka ay timaaado fulinta waajibaadkaaaga ee gargaar bixiyaha ugu horeeya ah?**

**J:** Tababarada gargaarka degdegga oo ay bixiso ICRC waxay yihiin kuwo wax tar badan leh. Waxaan khibrado badan ka helnay gaaridda nabdoon, amniga iyo maaraynta goobta iyo sidoo kale kala hormarinta dhibbanayaasha marka loo eego baaxadda dhaawacyadooda. Guud ahaan, waxaan helnay aqoon iyo waayo-aragnimo badan oo gargaarka degdegga ah.

**S: Maxay yihiin caqabadaha qaarkood ee aad la kulantay ilaa iyo hadda, intii aad shaqada ku jirtay?**

**J:** Waxaan la kulannay dhibaatooyin aad u badan xagga hawlaheena shaqada ah. Caqabadahaas qaarkood waxaa ka mid ah: rugaha baaritaanka ama jid gooyooyinka ay sameysteen xoogagga hubaysan oo dib u dhiga dhaqdhaqaaqeena magaalada gudaheeda, ambalaasyada oo nagu yar si aan ugu qaadno dhaawacyada, gaar ahaan marka ay jirto dhaawacyo farabadan; iyo dhibaatooyinka isgaarsiinta oo ay ka dhalatay tayada oo liidato ama la'aanta shabakado hareeraha hawlgalka ka socdo.

**S: Waa maxay tallaabooyinka nabdoonaanta ah ee aad tixgeliso marka aad ku sugan tahay goobta shaqada? Tusaale ahaan marka aad wax u qabaneyso dadka ku dhaawacmay qarax ama meel dadku ku badan yahay?**

**J:** Waxaan isku dayeynaa intii karaankeena ah sidii aan u xaqiijin laheyn in dadka meesha ku soo uruuray aan ku hayno fogaan 300 ilaa 400 mitir goobta wax ka dhaceen iyo in laga baarandego sidii si habboon loogu maareyn lahaa goobta wax ka dhaceen. Sidoo kale wada xiriirka saxda ah waa muhiim gaar ahaan marka aad maareyneysid koox inta lagu guda jiro wax ka qabashada xaaladaha degdegga ah. Sida darteed, waa in ay jirto kala warqaadasho inta hawsha aan la bilaabin si la isugu dubarido daabulidda dadka dhaawacmay iyo kuwa buka iyo nooca gargaarka degdegga la siiyo dhibbanayaasha kala duwan.

**S: Marka laga jawaabayo xaaladaha degdegga ah, sidee u hubisaa in naftaada ka ilaaliso caabuqyada marka aad wax u qabaneyso bukaanka iyo kan dhaawacmayba?**

**J:** Waxaan hubinaa in dhammaan xubnaha kooxda gargaarka degdegga ay haystaan qalabka ugu muhiimsan sida gacan-gashiyada, waji gashiga iyo kabaha buudka ah. Tani ayaa ah si anaga nafteena aan u qaadin caabuqa marka aad wax u qabaneyso kuwa buka iyo kuwa dhaawacmayba.

**S: Waxaan hubaa in qaar ka mid ah muuqaallada ay kugu reebaan naxdin badan. Sidee ula tacaali kartaa? La talin ma raadsataa?**

**J:** Haa, muuqaallada qaarkood haddii aysan dhammaantood waxay noqon karaan kuwo argagax leh. Laakiin, kala warqaadashada aan ka helno kormeeraheena ka hor inta aan bilaabin wax ka qabashada xaaladaha degdegga ah ayaa waxay nagu caawineysaa in aan ogaanno waxa aan filan karno. Waxaan maskaxda iyo fikirkaba ugu diyaar garownay waxa soo socda. Ka dib qaraxii dhimashada badnaa ee dhacay bishii Oktoobar 2017, ICRC waxay soo dirtay xeeldheere cilmi nafsi si u siiyo xubnaha gargaarka degdegga la talin.

**S: Sidee bey u weyn tahay kooxda gargaarka degdegga Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed?**

**J:** Kooxaha gargaarka degdegga ee Soomaaliya waxay ku xadidan yihiin magaalooyin yar oo keliya kuwaas oo ah meelaha mudnaanta ugu leh oo ah Muqdisho iyo Gaalkacyo. Si kastaba ha ahaatee, kooxaha gargaarka degdeggu waxay bixiyaan wax ka qabashada gurmadka gargaarka degdegga ee ugu wax ku oolsan uguna hufan marka loo eego kuwa kale ee ambalaasyada gaarka loo leeyahay ee ka hawlgala Soomaaliya. Ambalaasyada sida gaarka loo leeyahay keliya waxay sameeyaan daadgureyn laakiin ma bixiyaan daryeelka gargaarka degdegga ah oo ka duwan kooxda gargaarka degdegga Ururka Bisha Cas oo isla goobta ka bixiya adeegyada gargaarka degdegga ah waxayna u daadgureeyaan isbitaalka si u helaan daryeelka takhasuska ah.

# KHARIIRAD
# ISBITAALLADA IYO XARUMAHA CAAFIMAADKA OO AY TAAGEERTO ICRC



# KOR U QAADIDA WACYIGA DARYEELKA CAAFIMAADKA OO HALIS KU JIRO IYADOO LOO MARAAYO NAQSHADEYNTA




Kani waa mid ka mid ah toddobo farshaxan oo kale oo lagu sawiray derbiga isbitaalka kaas oo ah mashruuc ay soo saartay ICRC looguna talagalay in lagu abuuro wacyi-galin ku saabsan daryeelka caafimaadka Soomaaliya halis buu jiraa.

## "Wax hub ah looma oggola isbitaalka"

Tani waa calaamadda ugu horeysa ee kugu soo dhoweyneysa Isbitaalka Guud ee Kismaayo- waa isbitaalka ugu weyn oo magaalada ka bixiya daryeelka caafimaadka.

Daryeelka caafimaadku halis buu ku jiraa waa hindise calami ah oo ay hoggaamiso ICRC-da kaas oo doon doonaya in wax laga qabto arrinta rabshadaha ka dhanka ah bukaannada, shaqaalaha caafimaadka, dhismayaasha, gaadiidka, iyo in la hubiyo in si badbaado leh loo gaari karo iyo gaarsiinta daryeelka caafimaadka isbitaalada ku yaala degaanada u nugul colaada. Waxay kaloo diiwaangelisa rabshado la xiriira dhacdooyinka saameeya bixinta daryeelka caafimaadka, iyadoo la fiirinaayo in dhinacyada khuseysa iyo daneeyayaasha lagala hadlo lana baaro sidii sida ugu wanaagsan loo xaqiijin lahaa helitaanka adeegyada daryeelka caafimaadka oo lagu gaari karo si badbaado leh.

"Farriimahan daryeelka caafimaadka halis buu ku jiraa iyo dhiirigelinta daryeelka caafimaadka oo lagu xardhay derbiga keliya bukaannada soo gala isbitaalka gacan ugama geysan doonaan abuurista wacyi-gelin dheeraad ah laakiin waxay wacyi-gelin u yihiin qof kasta oo maraya wadada mashquulka badan ee isbitaalka" ayuu yiri Xuseen Sheqasin, Agaasimaha Isbitaalka.

Bukaannada soo gaara isbitaalku waxay ka imaanayan magaalada Kismaayo iyo tuulooyinka hoos imaada. Xaaladaha soo gaara isbitaalka ayaa waxay kala yihiin dadka qaba dhaawaca hubka, nafaqo-darrida, shuban biyoodka iyo jadeecada.

"Hubka oo lagu dhex qaato gudaha dhismaha isbitaalka waxay cabsi ku abuurtaa bukaannada waxaana ku boorinaa dadka booqanaaya bukaannada inay hubka dhigaan albaabka weyn ee isbitaalka halkaas oo yaala sanduuq la ilaaliyo oo hubka lagu keydiyo wayna ka qaadan karaan markay baxayaan" Xuseen ayaa intaa raaciyey.

Inta lagu guda jiro colaadaha, weerarada lagu qaado shaqaalaha daryeelka caafimaadka, dhismayaasha iyo gaadiidka waa khalad. Waxaa mamnuucay xeerka caalamiga ee bani'aadamnimada (oo sidoo kale loo yaqaan xeerka dagaalka), sababta oo ah waxay u diidaan dadka buka iyo kuwa dhaawacmayba in ay helaan daryeelka sida aadka ah loogu baahan yahay.

# MAXAY KA DHIGAN TAHAY IN SOOMAALIYA GUDAHEEDA LAGU NOQDO UMULISO?

Waxaa jiraa xoog badan oo caawimaad la'aan ah kaas oo bilaabanaaya marka aadan awoodin in aad wax sameyso si aad u yareysid silaca haweeney inta lagu jiro foosha.

Qiyaas adigoo u socda xarun caafimaad in aad cunug wadada ku dhasho. Imikana qiyaas adigoo haysta cunug dhowaan dhashay oo aad u maleysay inuu ku dhintay gacmahaaga oo kaliya aad dareemeyso xoogaa wadne garaac nuxuus ah. Kuwani waa qaar ka mid ah waaya-aragnimada nolosha dhabta ah ee ay wadaagaan umulisooyinka ka shaqeeya Soomaaliya.

Haa, dhalmada waa khaldami kartaa mararka qaarkood, laakiin qorsheynta habboon iyo daryeelka dhalmada ka hor ee la bixiyo xilliga uurka ayaa waxay kaa caawinaayaan saadaalinta dhibaatooyinka ka imaan kara nolosha ilmaha dhowaan dhashay iyo hooyada.

Nasiib darose, degaanada ay saameeyeen colaadaha oo helitaanka daryeelka caafimaadka asaasiga ah ay caqabad ku tahay, daryeelka takhasuska ah ayaa weli aan gaareyn inta badan haweenka uurka leh. Gudaha Soomaaliya, dhalmada badankeed waxay ku dhacdaa gacanta umulisooyinka ku sugan xarumaha caafimaadka Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed oo ku baahsan guud ahaan dalka.

Labo iyo toban ka mid ah umulisooyinkan ayaa ka qayb qaatay tababar ku saabsan uurreyda iyo dumarka oo lagu qabtay Nairobi, Kenya bishii Disembar 2018-kii. Waxaan weydiinay qaar ayaga ka mid ah waxa ku dhiirigeliyey iyo qaar ka mid ah daqiiqadahoodi aan la iloobi karin intii ilmo ka umuliyeen Soomaaliya gudaheeda.

FARTUUN NUUR CABDULLE WAA 25 SANO JIR OO DEGGAN DHUUSAMAREEB, GOBOLKA GALGADUUD.
KHIBRADEEDU WAA UMULISO: 3 SANO

"Hooyadey ayaa waxay igu dhiirigelisay in aan noqdo umuliso. Ma ku sugneyn xarun caafimaad mar ay miyir beeshay. Dad ayaa u yimid waxayna ku rusheeyeen biyo. Waan u murugooday maadaama aan waxba u qaban karin waqtigaas. Markaa waxaan go'aansaday in sida keliya ee looga hortagi karo dhacdadan oo kale ay tahay in aan noqdo umuliso."




Fartuun waxay dhabta ku haysaa ilmo boombalo ah intii lagu guda jiray tababar ku saabsan uurreyda iyo dumarka oo umulisooyinka Ururka Bisha Cas loogu qabtay Nairobi.




Baarliin waxay 'cunugga' ka saareysaa dheecaannada si loogu diyaariyo dib-u-soo neefsiinta.

BAARLIIN CABDI MAXAMED WAA 43 SANO JIR OO DEGGAN BAARDHEERE, GOBOLKA GEDO.
KHIBRADEEDU WAA UMULISO: 20 SANO

"Waxaa jirtay hooyo foolaneysay labo maalmood. Degaanka kama jirin wax isbitaal ah. Waxayna sidday mataano. Midkood ayaa si nabad ah ku umuliyey laakiin dhibaatooyin ayaa la maray cunugga labaad. Waxay dantu na badday in aan gaari ugu qaadno Beled Xaawo [ oo ah degmada ugu dhow ee Gedo]. Waxay umushay cunuggii labaad intii aan wadada ku jirnay. Taasi waxay aheyd mid ka mid ah waayihii igu farxadda badneyd shaqadeyda waxaana la saarnaa gaariga waqtiga oo dhan."



Soomaaliya gudaheeda, heerka dhimashada hooyada waa **732** dhimashada hooyada ee **100,000** ee ku dhasha nolol, taas oo ka dhigaysa Soomaaliya in ay tahay dalka lixaad ee adduunka ee heerka ugu badan ee dhimashada hooyada. (Indha-indheynta Caafimaadka Caalamiga ee Ururka Caafimaadka Adduunka, 2015)




Nimco Xassan oo daawaneysa bandhig lagu muujinaayo qaabka aan caadiga aheyn oo uur-ku jirka u soo dhashto. Tani waa marka cunuggu yahay dabo keen halkii uu madaxa ka soo hormarin lahaa. Inta badan uur-ku jirka u yaallo sida aan caadiga aheyn waxaa lagu dhaliyaa qalliin sababta oo ah waxaa loo arkaa inay ka ammaan badan yihiin kuwa ku dhasha ilmamareenka.

NIMCO XUSSEN CUSMAAN WAA 22 SANO JIR OO DEGGAN DHUSAMAREEB, GOBOLKA GALGADUUD.
KHIBRADEEDU WAA UMULISO: 3 SANO

"Xarunta Caafimaadka ee Ururka Bisha Cas waxay u qalabeysan tahay wax ka qabashada dhalmada caadiga ah [ee khatarteedu yar tahay]. Hal mar, ayaa hooyo ilmo hore ugu dhashay guriga iyada oo gacan ka heleysa umuliso shaqameed inoo timid. Ayadoo weli mandheertu ku jiro laakiin cunuggu wuu soo baxay. Nasiib wanaag, afka ilmogaleenka wuu furnaa waxaana awooday in aan xasiliyo iyada oo mandheerta ka soo saaro. Waxaa jiray dhiigbax badan."




Fardosa waxay si cilmiyeysan u gedgedinaysa 'cunugga' intii lagu guda jiray kulan ku saabsan maaraynta dhalmada dhibka badan.

FARDOSA CABDI CABDULLAAHI (MIDIG)WAA 24 SANO JIR OO DEGGAN MUGDISHO, GOBOLKA BANAADIR.
KHIBRADEEDU WAA UMULISO: 4 YEARS

"Soomaaliya waxaa ka jira dhimashada la xiriirta umul raaca oo heerkeedu sareeyo. Hooyadey waxay ku dhibtooneysay helitaanka umuliso intii ay uurka laheyd. Haweeney uur leh iyadoo si xun u dhiig baxeysa ayaa mar timid xarunta caafimaadka ee aan ka shaqeeyo. Waxaan ku guuleysaney in aan badbaadino cunugga iyo hooyada labadaba. Waxaan isku dayaa inaan kaalinteyda qaato si aan u yareeyo tirada dhimashada hooyada."




Nadfiia waxaa la baray maaraynta firfircoon ee mandheerta.

NADIIFA ABUUKAR MAXAMED WAA 32 SANO JIR OO DEGGAN MUGDISHO, GOBOLKA BANAADIR.
KHIBRADEEDU WAA UMULISO: 6 YEARS

"Waxaan ku jiray keligay shaqada habeenkii xarunta caafimaadka markii hooyo foolaneyso ay timid. Waxaa horeba u soo haayey xanuun daran iyadoo waqti badan ku soo lumisay umuliso dhaqameed oo aan guul laga gaarin. Afka ilmo-galeenkeedu ayaa si buuxda u furnaa diyaarna u ah inuu cunuggu soo dhaafo. Marka ma jirin waqti lagu hubiyo xaaladeeda ama la siiyo daawo. Intii aan gashanaayey gamo-gashiyada ayaa waxay bilowday gariir. Meesha waxaa ku sugnaa keligay iyo hooyada oo ku dul garrireysa sariirta lagu dhalo iyo cunugga oo daqiiqad kasta soo bixi karay. Waxaan u yeertay caawimaad laakiin waardiyaha meel fog ayuu ku sugnaa. Ma garaneyn waxa aan sameeyo. Ma hooyada qariireysaan qabtaa si aan uga ilaaliyo inay ka soo dhacdo sariirta mise cunugga ayaa la macaamilaa halkii hooyada aan ku mashquuli lahaa. Waxaan qaatay halista waxaana ku xiray suunka sariirta. Ka dib waxaan ku degdegay marfish igu dhowaa si aan u soo qaato daawo aan siiyo iyada ka hor inta aan dareenkeyga u jeedin cunugga. Thanks to Allah, hooyadii waxay umushay cunug caafimaad qaba."




Cayni oo dhegeysanaysa heerka garaaca wadnaha uur-jiifka.


CAYNI CUSMAN XIDING WAA 44 SANO JIR OO DEGGAN BAYDHABO, GOBOLKA BAAY.
KHIBRADEEDU WAA UMULISO: 9 YEARS

"Sida u yaallo cunuggu wuxuu ahaa mid bannaanka u soo baxay. Ka hor inta aan hooyada la keenin xarunta, qof umuliso dhaqameed ah ayaa isku dayday in ay ka umuliso cunugga laakiin ma aysan awoodin inay ka umuliso. Hooyadu waxaa hayey xanuun fara badan. Waxaan ogaanay ka dhalinta ilama-mareenka in aan suura gal aheyn oo aan sugno dhakhtar ku sameeya qalliin. Intaas oo dhan, hooyadu waxay ku sugneyd xaalad silic iyo saxariir ah, wayna caabaadeysay iyadoo naga codsaneyso caawimaad misna na weydiineyso sababta isaga taagannahay oo u dhawreyno. Ugu dambeyntii waxaan u wareejinay qolka qalliinka dhakhtarkana qalliin ayuu ku sameeyey. Waxaan u qaadanay in cunugu dhintay. Waxaan bilaabay in aan maro ku duudubo cunugga markii aan fakaray ayaa waxaan dareemay garaaca wadnaha oo nuxuus ah. Cunuggu wuxuu u muuqday in uumistiisu aan aheyn caadi wejigana wuu ka bararsanaa dhibaatooyin darteed, run ahaantiina aniga waxba waan sheegi kari waayey. Aniga markiiba waxaan bilaabay in aan u sameeyo dib-u-soo neefsiin oo shaqaysay. Ugu dambeyntiina hooyada iyo cunuggaba badqab bay ahaayeen. Tani waxay aheyd waayo-aragnimo cabsi leh."

# FARRIIMAHA DHIIRI-GELINTA CAAFIMAADKA HAWEENKA UURKA LEH

Hooyooyinka iyo caruurtooda waxaa lagula talinaya in ay booqdaan xarumaha caafimaadka hooyada iyo dhallaanka marka uurka ay leeyihiin iyo ka dib dhalashada. Tani waxay gacan ka geysan doontaa yareynta dhibaatooyinka ka dhalan kara xilliga uurka iyo dhalmada. Xarumaha caafimaadku waxay kaloo bixiyaan talo hubineysaa badbaadada hooyada iyo ilamaheeda.

## CAAFIMAADKU WAA DANTA QOF WALBA



## SI AAD UGU DHASHO XARUNTA CAAFIMAADKA, BOOQO WAQTIGII LOOGU TALAGALAY




## HOOYONIMO NABDOON



## HA ILOOBIN IN AAD SI JOOGTO AH U BAARTO CADAADISKA DHIIGGAGA



Inta badan iyadoo la shaqayneysa la hawlgalayaasheeda Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas, ICRC waxay caawisaa dadka ku nool daafaha adduunka oo ay saameeyeen iska horimaadyada hubaysan iyo xaaladaha kale ee qalalaasaha iyada oo sameyneysa wax kasta oo ay awoodo si ay u dhowrto sharaftooda una yareyso dhibaatadooda. Iyadoo la dhiirigelinaayo lana xoojinaayo xeerka bani'aadamnimada iyo iyadoo u doodeysa Mabaadi'da caalamiga ah ee bani'aadamnimada ayaa ururku waxaa kaloo doon doonaya inuu ka hortago dhibaatooyinka.

facebook.com/icrc
twitter.com/icrc_Africa
www.instagram.com/icrc_afrique
https://blogs.icrc.org/somalia/

**ICRC Somalia Delegation**
Denis Pritt Road
P.O. Box 73226 - 00200
T +254 20 2719 301
Nairobi, Kenya
www.icrc.org
Cover photos: ICRC
© ICRC, August 2019

ICRC

2019.1088/402 08.2019 3000